



## Waxaan raadineynaa xubin bulshada ka tirsan oo u adeega Guddiga Hanti dhawrka Degmada

Ma leedahay waayo-aragnimo la xiriirta qabashada dhanka hanti dhawrka? Dugsiyada Dadweynaha Portland wuxuu raadineyaa in uu booska Guddiga Hanti dhawrka Degmada ku buuxiyo xubin bulshada ka tirsan.

Guddiga Hanti dhawrka Degmada waxaa loo aasaasay si loo ilaaliyo madax bannaanida barnaamijka hanti dhawrka degmada. Waxay la tashataa isla markaana talo siisaa hanti dhawraha gudaha ee PPS si ay caawimaad uga geystaan xaqijinta habsami u socodka iyo shaqeynta wax ku oolka ah ee degmada.

Guddiga waxaa magacaabay Guddiga Waxbarashada PPS, waxayna ka kooban yihiin saddex xubnaha guddiga dugsiga ah iyo laba ah xubnaha bulshada ka tirsan. Xubnaha bulshada ka tirsan waxay xilka hayaan muddo laba sano ah. Waqtiga go'ani ee mas'uuliyada shaqo waa saddex ilaa siddeed saacadood bishii. Waqtigan la joogo, hal boos oo ah xubinta bulshada ka tirsan aaya bannaan. Haddii aad leedahay waayo-aragnimo dhanka hanti dhawrka ah isla markaana aad jeelaan lahayd inaad codsado, fadlan warqada wax daneyn ta iyo warqada shaqada u soo gudbi 'resume' [msalvador@pps.net](mailto:msalvador@pps.net). Wixii macluumaad ah, fiiri [siyaasadda guddiga ee waxqabadka hanti dhawraha degmada](#).